



Bayaanka Saameynta Sinnaanta: Kamidnoqoshada MIAA

Cinwaanka: Kamid noqoshada Massachusetts Interscholastic Athletic Association (MIAA): **Taariikhda:** Luuliyo 13, 2022

Miyaa [Racial Equity Planning Tool](#) la isticmaalay? Haa Maya

Hadday haa tahay, geli taariikhda(yada) shirarka REPT oo isku xidhka REPT ee dhammaystiran halkan:

Xubin ka tirsan Qaybta Sinnaanta, Istaraatiijiyada iyo Nusqaamaha Fursadaha miyuu dib u eegay bayaankan? Haa Maya

Qaybaha Habka Qorshaynta Sinnaanta Midabka Jinsiga BPS	Si Kooban/Sababta
<p>1. Qalqaalo/Soojeedin & Saamaynta <i>Waa maxay natiijooyinka la rabo ee codsiyada/dadaalada, oo ay ku jiraan ka saarida meesha khilaafka? Yaa horseeday shaqadan/qorshaynta, oo miyay ka tarjumayaan aqoonsiga kooxda ardayda BPS iyo qoysaska (kooxaha muhiimka ah waxaa ka mid ah shakhsiyaadka madow, Latinx, Aasiyaan, asal ahaan, soo galooti, luqado badan, oo leh khibrad Waxbarasho Gaar ah)?</i></p>	<p>Waqti xaadirkaan, Ma ahan in ay dhamaan ardayda Iskuulada Dadweynaha Boston(BPS) ee fasadalada 9 laad ilaa 12 naad ay ka qeyb gali karaan tartamada cayaraha oradka ee iskuulada dhexdooda. U gudbinta codsiga Massachusetts Interscholastic Athletic Association (MIAA) oo uhadlayaa iskuulada kuwaaso aan hada kamid ahayn si ay u xaqiijiyaan in dhamaan ardayda BPS ee fasalada 9 laad ilaa 12 naad in ka qeyb gali karaan tartamada cayaraha oradka iskuulada dhexdooda Codka gudiga iskuulka ayaa ah qeyb looga baahnyahay habraacaan si loo dhameystiro codsiga kamid noqoshada MIAA</p> <p>Kaqeyb qaadshada degmada MIAA ayaa xubin muhim ah si loo xaqiijiyo in ardaydeena, Kuwaas oo intooda badan xubno ka ah dadyowga la haybsooco, waxay fursad u haystaan inay ka qaybgalaan tartanka ciyaaraha kooxda.</p>
<p>2. La jaanqaadida Qorshaha Istaraatiijiga ah <i>Sidee baa qorshaha istaraatiijiga degmadu u waafaqsan yahay codsiga/dadaalka?</i></p>	<p>Dib usoo cusbooneysiinta kamid noqoshada ayaa keyneyso qorsho habraced oo ah goan ka garida si loo cirib tiro fursaha banan iyo balaarinta fursadaha.</p>
<p>3. Falanqaynta Xogta <i>Xogtee ayaa la falanqeeyey? Miyaa lagula kala saaray jinsiga iyo kooxa kale? Maxay muujisay oo khuseysa kala duwanaanshaha?</i></p>	<p>Waxaa jirto qimeyn lasameyay taaso shegeyso fasalada 9 laad iyo 12 naad ee waqti xaadirkaan in aysan ahayn xubno katirsan MIAA codsashada kamid noqoshada dhamaan iskuulada BPS waxay ka cawineysaa in ay udhaweyso fursadaha tartamada oradka degmada oo idil.</p>
<p>4. Hawlgelinta Daneeyayaasha <i>Yaa ka shaqeeyey (tirada, kooxaha muhiimka ah, iyo doorarka) iyo sida, iyo waxa natiijadu noqotay? Maxaa ardayda/qoysaska inta ugu badan saameeyey codsigan/dadaalkan?</i></p>	<p>MIAA, Hogaamiyayaasha iskuulada, agaasimaha ciyaaraha oradka ee BPS, Tababarayasha, oradyahanada ardayda iyo Waaxda shaqaalaha oradka ee BPS ayaa lala tashatay. Ardayda ayaa sharaxay dareenkooda ay u qabaan kamid noqoshada tartamada oradka ee BPS Hawlgalo dheeraad ah ee ardayda iyo qoysaska ayaa dhici doona marka aan hirgelinno fursado cusub oo ciyaaraha oradka.</p>
<p>5. Xeeladaha Sinaanta Jinsiga <i>Sidee ayuu codsigan/dadaalkan u yareeyey kala duwanaanshaha una kordhiyey jinsiga iyo saamiga kale? Waa maxay cawaaqibta aan lagu talo galin ee macquulka ah? Istaraatiijayadehee ayaa kor u qaadaya saamiga?</i></p>	<p>Qalqaaladan ayaa quseysa melaha qaaska ee banaan kuwaaso jiro waqti xaadirkaan e udhaxeyo iskuulada kuwaaso xubin ka MIAA, iyo iskuulada an kamid ka ahayn. Miyaa la aqbal doonaa codsiga kamidnoqoshada MIAA, Dhammaan ardaydu waxay heli doonaan fursad ay kaga qaybqaataan ilaa iyo inta ay ka soo baxayaan shuruudaha uqalmitaanka MIAA ee shakhsi ahaaneed. Uqalmitaanka ayaa lagu qiimeyaa arrimo ay ka mid yihiin fasalada, da'da, iyo inta sano ee udhiganayay iskuulka.</p>
<p>6. Miisaaniyada & Hirgelinta <i>Waa maxay saameynta miisaaniyadu? Sidee hirgelintu u xaqiijinaysaa in dhammaan</i></p>	<p>Mashruuca waqti xadirkaan ee FY23 ayaa waxaa kamid ah dhaqaalo dheeraad ah ee loogu talagalay kobcinta cayaaraha, iyo waxayna dabooli doontaa kharashka dheeraadka ah ee khidmadaha kamidnoqoshada</p>

<p><i>ujeedooyinka, gaar ahaan ujeedooyinka la xidhiidha sinnaanta, la gaadhay? Waa maxay kooxaha aqoonsiga kale ee kooxda hirgalita, oo miyey eegi doonaan saamiga?</i></p>	<p>MIAA sanadlaha ah. Dhamaan iskuulada leh arday dhigata fasalada 9laad iyo 12 naad ayaa lagusoo dari doonaa, iyo dhaqangelintana waxaa ka mid ah in si gaar ah loo caddeeyo daldaloolo kasta oo ka mid ah helitaanka iyo xeelado wax ku ool ah oo lagu xiro boosaskaas banaan.</p> <p>Markii dhamaan iskuulada ay kamid noqdaan MIIA, Ardayga dhigta iskuulka BPS ee aan waqti xaadirkaan bixin ciyaar gaar ah wuxuu awoodi doonaa inuu ka qayb qaato ciyaarahaas iskuul kale oo BPS ah oo bixiya. Waaxda tartamada cayaraha oradka, iyada oo lala kaashanayo maamulayaasha iskuulada, kuxigeenka Kormeeraha Hawlaha, iyo shaqaalaha MIAA, ayaa kawada shaqayn doona diyaarinta kooxo iskaashato oo iskuulo badan ah, iyo hubinta in dhammaan ardayda xaqa u leh ay ka warqabaan fursadahaas.</p>
<p>7. Islaxisaabtanka & Isgaarsiinta <i>Sidee ayaa sameeynta loo qiimeyn doonaa, qori doonaa looguna gudbin doonaa daneeyayaasha? Yaa ka masuul noqon doona?</i></p>	<p>Saamaynta waxa lagu qiimayn doonaa lambarada ka qaybgalka, iyo iyada oo lala socdo awooda ardayda si ay ugu sii sugnaadaan u qalmida ka qaybgalka. Waaxda tartamada cayaraha oradka, ayadoo taageero ka heleyso qeybaha arday, waxay diwaangalin doontaa oy taarikhda ka qeyb galka kala xariiri doonta mamulka iskuulka, agaasimaha tarmada cayaaraha oradka yo MIAA sanad walba.</p>